



Hadaljeedinta Gudoomiyaha

## Bilowga Bisha Ramadaam: Gudoomiye Smith

Maarso 22, 2023

Gudoomiye Daielle Smith waxay soo saartay hadaljeedinta madaama Ramadaan uu bilaabanayo:

"Waxaan rabaa inaan u rajeyyo Muslimiinta Alberta iyo adduunka oo dhan Ramadaan caafimaad qaba, farxad leh, oo nabab ah.

"Ramadaan waa bisha sagaalaad ee kalandarka Islaamka, waxaana muslimiintu u asteeyaan xilli cibaado, fikir iyo dib u cusboonaysiin. Inta lagu jiro toddobaadyada soo socda, Muslimiintu waxay soomi doonaan qorrax soo baxa ilaa qorrax dhaca ka dibna waxay la kulmi doonaan qoyska, asxaabta, iyo bulshada kale si ay ugu raaxaystaan cuntada fiidkii, oo loo yaqaan afurka.

"Ramadaanku waxa kale oo uu xooga saarayaa muhiimada naxariista, niyadwanaaga, iyo wanaaga dadka kale loo qabo. Waa waqtigii la caawin lahaa kuwa nasiibka yar iyadoo loo marayo samafal iyo iskaa wax u qabso.

"Waxaan hambalyo diiran u diraynaa dhammaan dadka bishan barakaysan soomaya. Ramadaan Mubarak!"

### Wediimaha warbaahinta

Rebecca Polak  
[rebecca.polak@gov.ab.ca](mailto:rebecca.polak@gov.ab.ca)

Agaasimaha Isgaarsiinta  
maalinlaha ah iyo Xoghayaha  
Warfaafinta

Xafiiska Gudoomiyaha